

Ku socota Kiraystaha (*magaca*): \_\_\_\_\_

Ciwaanka Kiraystaha: \_\_\_\_\_

## **Ogaysiiska Afar iyo Tobanka Maalin ee Bixinta Kirada ama Guriga Ka Guurista**

Waxaad helaysaa ogaysiiskaan sababtoo ah mulkiilaha gurigaaga ayaa kugu eedayaaya inaadan ku dhaqmin shuruudaha heshiiskaaga kirada adoo ku fashilmay inaad bixiso kirada soo socota, adeegyada guriga iyo/ama kharashaadka soo laalaabta ama goos-gooska ah oo aad la daahday.

Meeqaa lagugu leeyahay? Bilahee lagugu leeyahay? (tig saar dhammaan meelaha ay qusayso)	Cadadka doolarka
<input type="checkbox"/> Kirada bilaha ah ee (liiska bilaha):	\$
<input type="checkbox"/> Lacagta adeegyada guriga (liiska bilaha):	\$
<input type="checkbox"/> Qarashaadka kale ee joogtada ah ama goos-gooska ah ee lagu qeexay heshiiska kirada _____ (liiska bilaha):	\$
<b>Wadarta Guud ee Cadadka</b>	\$

### **Waqtiga kama danbaysta ah!**

Waa inaad dhiibtaa wadarta guud ee mulkiilaha gurigaagu kugu leeyahay muddo **afar iyo toban maal mood ah (14) maal mood** kadib marka lagu siiyo ogaysiiskaan, ama waa qasab inaad ka guurto guriga.

Lacag kasta oo aad u dirto mulkiilaha guriga waa in marka hore lagu dabaqaa wadarta guud ee lagugu leeyahay ee ku cad ogaysiiskaan.

Ku fashilmida ku dhaqanka ogaysiiskaan muddo afar iyo toban (14) maal mood ah kadib marka lagu siiyo adeeggaan ayaa keeni karta dacwad sharci oo keenaysa in lagaa saaro guriga.

### **Sida lacagta loo dhiibo**

Waxaad adeegsan kartaa qaab kasta oo lacag bixin oo lagu ogol yahay heshiiskaaga kirada. Ama waxaad adeegsan kartaa kaash, jeega qasnajiga, dalabka lacagta, ama sanduuqyada kale ee la ogol yahay.

### **Caawimaada kirada iyo turjumaada**

Office of the Attorney General (Xafiiska Qareenka Guud) ee Gobalka Washington ayaa ogaysiiskaan ku haya luuqado badan iyo sidoo kale xogta khayraadka la heli karo si lagaaga caawiyo bixinta kiradaada, ayna ku jiraan barnamijaya caawimaada kirada ee gobalka iyo kuwa maxaliga ah, oo aad ka helayso webseedkooda oo ah [atg.wa.gov/landlord-tenant](http://atg.wa.gov/landlord-tenant).

Sharciga gobala ayaa ku siinaaya xaq aad ku hesho adeegyada turjumaanka oo aad ku helayso maxkamada.

### **Caawimaada sharciga**

Sharciga gobalka ayaa ku siinaaya mataalaada sharciga maxkamadaayaana awoodi karta inay magacawdo qareen ku mataala oo bilaash ah haddii aad tahay kirayste danyar ah oo u qalma.

Haddii aad aaminsan tahay inaad tahay kirayste danyar ah oo u qalma aadna doonayso in la magacaabo qareen ku mataalaaya, fadlan la xariir:

- **Eviction Defense Screening Line (Laynka Baaraanka Difaaca Kahortaga Guri ka saarida)** 855-657-8387
- Oonleen ku codso: [nwjustice.org/apply-online](http://nwjustice.org/apply-online)

### **Macluumaa dheeri ah**

- Wac 2-1-1
- Northwest Justice Project CLEAR Laynka Ka shaqeeyaa Banaanka Degmada King: 888-201-1014, Maalmaha asbuuca 9:15 subaxnimo. – 12:15 duhurnimo, ama dadka waayeelka ah ee jira 60 iyo ka wayn: 888-387-7111
- Waxaad ka heli kartaa xog dheeraad ah oo ku caawinaysa barta [washingtonlawhelp.org](http://washingtonlawhelp.org)

### **Xalinka khilaafka**

Adeegyada dhedhexaadinta ee bilaashka ah ama qiiimaha jaban oo kaa caawinaaya khilaafaadka bixin la'aanta kirada kahor intaan dacwad sharci bilaaban ayaa sidoo kale laga heli karraa xarumaha xalinta khilaafaadka ee dhammaan gobalka.

Waxaad ka helaysaa xarunta kuugu dhow ee xalinta khilaafaadka barta [resolutionwa.org](http://resolutionwa.org).

Saxiixa Mulkiilaha/Dhulaha ➤ Taariikhda: \_\_\_\_\_

**Meesha cadadka guud ee lacagta lagu bixinaayo:** Magaca Mulkiilaha Dhulka: \_\_\_\_\_

Ciwaanka: \_\_\_\_\_